

# Barnaamijka Qaxooti Si gaar ah Loo Kafaale Qaaday Deb u dejinta Qaxootiga gudaha Canada

## Macluumaadka Muhiimka ah

Waxaad doonaysaa inaad timaado Canada oo codsigaaga waxa dib u eegay marka hore saraakiisha Canada. Hadda waxaad ka war sugaysaa xulistaada hadii aad qaxooti qof u qalma tahay oo ah tallaabo muhiim u ah oo nidaamka dib u dejinta ah. Laakiin maaha tallaabadii u dambaysa.

**Macluumaadkan ku saabsan tallaabooyinka xiga ee nidaamka, iyo waxa ku saabsan Canada.**



© Boqorada sharafta leh Xaqa Canada oo uu metelo Wasiirka Socdaalka, Qaxootiiga iyo Muwaadinimada, 2019

Ci44-19/2019Som-PDF  
978-0-660-32868-3  
2627-11-2019

# **Barnaamijka Qaxooti Si gaar ah Loo kafaalo qaaday**

---

Waxaa dib lagu dejin karaa Canada hoos imanaya Barnaamijka Gaarka ah ee Qaxootiga la kafaale qaaday. Tan macnaheedu waxa weeye in koox ku kafaale qaaday oo gaar ah ay kaa taageeri doonto adiga dhaqaale ahaan iyo dareen ahaan muddada sanadkaaga koowaad ee Canada.

Marka la iskiin waafajiyo kafaale qaade gaar ah, waxaa la iskiin waafajinayaa koox dad ah oo aad u rabo inay kaa caawiyaan inaad la qabsato nolosha Canada.

Dadkan dowladdu lacag kuma siiyo inay ku caawiyaan. Waa mutadawaciin kuwaas oo u heelan inay ku kafaale qaadaan sababtoo ah waxay doonayaan inay ku caawiyaan. Kooxaha ku kafaale qaaday lacag ayay iska ururiyaan si ay kuu siiyaan caawimada iskood ah.

Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad la xidhiidho kafaale qaaday marka aad sugayso oggolaanshaha inaad timaado Canada. Tan waxaa lagu samayn karaa iimaylo, wicitaano telefoon ama fariimo onlayn ah.

## **Nidaamka codsiga – tallaabooyinka xiga:**

- Adiga iyo xubnaha qoyskaaga waa in la amariyaa baadhitaan caafimaad ka hor inta aanay iman Canada.
- Kharashka baadhitaanka, oo ay la socoto adeegyada kale ee caafimaadka ka hor inta aanad tegin, waxaa bixisa [dowlada](#) Canada.
- Waxay qaadan kartaa dhowr bilood ka dib waraysigaaga ka hor inta aan lagaa dalban inaad u timaado baadhitaanka caafimaadka. Ururka Caalamiga ah ee Socdaalka ama [Socdaalka, Qaxootiga iyo Xafiiska Socdaalka Muwaadinimada](#) Canada waxay kula xidhiidhi doontaa faahfaahinta dheeraadka ah haddii aanad hadda ka hor marin baadhitaanka.
- Sidoo kale waa inaad gudutaa baadhitaanka falka dembiyeed iyo amni. Kuwan waxay hubiyaan inaad gelin wax dembiyo khatar ah muddadii la soo dhaafay, oo aanay halis amni ku hayn Canada.
- Saraakiisha Canada waxay dib u eegi doonaa codsigaaga si ay go'aan uga gaadhaan haddii aad ka gudubtay baadhitaanka caafimaadka, amniga iyo fal dembiyeedka. Iyaddoo la dalbado moojee, lagaagama baahna inaad adigu gudbis wax macluumaad dheeraad ah.
- Haddii aanad gudbin baadhitaanada caafimaadka, amniga iyo dembiga, laguuma dooran doono dib u dejinta Canada.
- Haddii aad gudubso baadhitaankaaga caafimaadka, amniga iyo dembiga, Canada waxay waydiisan doontaa Ururka Caalamiga ah ee Socdaalka, ama urur kale, inuu kaa caawiyo inaad u diyaar ahaato inaad u soo safarto Canada.
- Wadamada qaarkood, waxaa lagu marti qaadi doonaa inaad ka soo qayb gasho kullanka hanuuninta ka hor inta aanad tegin. Kuwan waa kullamo bilaash ah, oo loogu yeedho Hogo tusaalaynta Dalka dibadiisa ee Canada, oo waxaa lacagta bixiya dowladda Canada oo waxaa bixiya Ururka Maalamiga ah ee Socdaalka. Kullanka, waxaad ku baran doontaa wax ku saabsan Canada kuwaas oo la heli karo si ay kuu caawiyaan adigu inaad kula qabsato markaad timaado.
- Haddii aan lagugu marti qaadan inaad ka soo qayb gasho kullanka Hanuuninta tusaalaynta Dalka dibadiisa ee wadankaaga, ogaysii kafaale qaadahaaga oo waxa uu hubin doonaa inaad hesho macluumaadka marka aad timaado Canada.



## Ku nolaanshaha Canada:

- Markaad gudubto dhammaan imtixaanada oo waraaqahaaga ay diyaar noqdaan, safarkaaga Canada waa la habbayn doonaa.
- Wadamada qaarkood waxaad u baahan karaan inaad siiso kharashka ka bixida dowladda wadankaaga ee aad degen tahay ka hor inta aanad ka bixin. Marka waxaa lagaaga baahan yahay inaad kharashkan siiso laftaada, Ururka caalamiga ah ee Socdaalka waxa uu kaa caawin doonaa nidaamkan.
- Haddii aanad haysan baasaboora ama warqadda safarka oo kale oo ansax ah, dowladda Canada waxay ku siin doonaa waraaqo markaas waxaad u safri kartaa Canada.
- Dowladda Canada waxay ku siin doontaa amaah si ay u daboosho kharashka safarkaaga ilaa Canada.
- Lacagtu waa **amaah**, taas oo macnaheedu yahay inaad dib u bixin doonto wadarta qadarka dowladda mudo 3 ilaa 8 sanadood gudaheed ah, iyaddoo ku xidhan qadarka amaahda. Waa inaad bilowdaa dib u bixinta amaada 1 sano gudahood oo imaanshahaaga Canada ah. **Kafaale qaadahaagu ma gudi doono amaahdaada.**
- Waxaa lagu siin doonaa caawimo si aad u gaadho garoonka diyaarada iyo si aad ula macaamisho saraakiisha socdaalka marka aad tagto.
- U safarka goobta u dambaysa ee safarka gudaha Canada waxay noqon kartaa safar dheer. Waxaad soo qaadan kartaa cuntooyinka fudud maadama aad iska bixinayso lacagta cuntadda ee diyaarada ama garoonka diyaarada.

## Imaanshaha Canada:

- Marka ugu horaysa ee aad timaado Canada, shaqaalaha ururka adeeg bixiyaha, oo uu ku jiro turjubaanka haddii loo baahdo ayaa ku ku salaami doonaa marka aad ka degto diyaarada oo waxay kaa caawin doonaa nidaamyada socdaalka.
- Haddii aad leedahay isku xidhka duulimaadka, waxay kugu hagi doonaan goobta aad u safrayso ee u dambaysa. Sidoo kale waxay ku siin doonaan adiga cunto iyo meel la seexo haddii aad sugayso saacado badan ka hor isku xidhkaaga duulimaadka.
- Haddii aad soo gaadhay goobtaada u dambaysa ee safarka, waxay ku keeni doonaan si aad ula kullanto kafaale qaadahaaga kaas oo adiga kugu sugi doonaa madaarka.
- Kafaale qaadahaagud waxa uu ku siin doonaa meel aad degto, sida guri dabaq ah, guri ama huteel.
- Xaaladaha qaarkood waxaa lagu siin doonaa hoy ku meel gaadha ah dhowr maalmood ama todobaad ilaa lagu roro hoy ku meel gaadh ah.
- Kafaale qaadahaagu waxa uu ku siin karaa qayb saad ah marka ugu horaysa eed timaado oo waxay kaa caawin doonaa cuntaddaada iyo dharka wata taageerada dhaqaale ee ay bixiyaan.
- Waxaa sidoo kale lagu siin karaa dharka jiilaalka.



- Kafaale qaadahaagu sidoo kale waxa uu ka jawaabi doonaa dhammaan su'aalahaaga ku saabsan nolosha Canada oo waxay kaa caawin doonaan in:

o aad hesho turjubaani;

o aad hesho dhakhtarka qoyska iyo dhakhtarka ilkaha;

o aad codsato caymiska daryeelka caafimaadka gobolka;

o aad u habayso carruurtaada inay dugsiga aadaan.

o aad la kullanto dadka leh xiiso gaar ah sidaada oo kale;

o aad isticmaasho adeega bangiyada, gaadiidka, iwm; iyo

o kugu xidha adiga adeegyada dejinta dowladu maalgeliso, sida tababarka luqadda, adeegyada shaqada, iyo kuwa kale.

Kafaale qaadahaagu waxa uu ku siin doonaa taageerada koowaad si uu kaaga caawiyo bilaabida noloshaada gudaha Canada. Laakiin adiga aad ayay kuugu muhiim tahay inaad yeelato filashooyin waaqiciga ku salaysan.

Waa inaad u diyaar garowdaa inaad si adag u shaqayso si aad aad uga faa'idaysato noloshaada Canada.

Taageerada dhaqaalaha ah ee ka timid kafaale qaadaha gaarka ah waa ilaa 1 sano laga bilaabo taariikhda aad timaado, ama ilaa aad isku filaansho gaadho – kuu doonaa ha soo horeeyee. Waxaad u baahan doontaa inaad taageerto naftaada iyo qoyskaaga ka dib 1 sano.



## Dib ula degida qoyskaaga.

Adiga iyo xaaskaaga, carruurta aad ka masuulka tahay, iyo carruurta ku tiirsan carruur laga masuul yahay waxay ku codsan karaan foom socdaalka ah oo isku mid ah oo waxay u imanayaan Canada si wada jir ah.

Haddii uu jiro **wax isbeddelo ah** oo heerkaaga guurka ah (tusaale, waad guursatay ama furday), ama haddii aad ilmo dhasho wakhti kasta ka hor safarkaaga Canada, **waa inaad** u sheegtaa kafaale qaaahaaga iyo saraakiisha Canada. Tani waxay keeneysaa in xubnahaaga qoyska ee cusub lagu dari karo codsigaaga socdaalka.

**Aad ayay muhiim u tahay** inaad u sheegto kafaale qaadahaaga iyo saraakiisha Canada inaad doonayso inaad dib ugu ula degto qoyskaaha. Wa inaad ku qortaa dhammaan xubnaha qoyska codsigaaga. Haddii aanad u sheegin saraakiisha Canada waxa ku saabsan xaaskaaga ama ilmaha ka hor inta aanad ka tegin Canada, awood uma yeelan doontii inaad iyaga kafaalq qaado si ay u yimaadaan Canada mustaqbalka.

Haddii ay jiraan qaraabadaada ama saaxiibo dhow kuwaas oo jooga Canada, oo aad jeceshahay inaad ku ag noolaato iyaga, waa inaad u ogaysiisaa kafaale qaadahaaga iyo saraakiisha Canada. Sida badan ee suuragalka ah, Cabada waxay isku daydaa inay dejiso qaxootiga gudaha bulshada halka ay ka helaan taageerada dadka ay garanayaan.

Waxaa lagu dejin doonaa magaalo la mid ah ama aaga ku xeeran halka kafaale qaadahaagy degen yahay. Haddii aad leedahay qaraabo ama xidhiidho gudaha bulshadda halka kafaale qaadahaagu degen yahay ama aad leedahay wakiil waxay isku deyi doonaa inay ku dejiyaan bulsho la mid ah.

Haddii qaraabadaada ama xidhiidhadu ay u guuraan magaalo kale gudaha Canada, fadlan u sheeg kafaale qaadahaaga sida ugu dhakhaha badan ee suuragalka ah markaas waxay kaala shaqayn karaan in la go'aamiyo haddii uu jiro taageero degenaanshaha oo ku habboon bulshadda cusub.

Waxaa sidoo kale lagu aqoonsan karaa qof "cid kali socota" oo xubnaha qoyska codsigaaga. Markaad degto Canada, waxaad awood u yeelan doontaa inaad keento xubnaha qoyska Canada taas oo hoosta imanaysa barnaamijka loogu yeedho Fursada Daaqada Halka Sano. Waxaad codsan kartaa sanadkaaga koowaad ee imaanshaha Canada si xaaskaaga, lamaana sharciga guud, ilmaha aad ka masuulka tahay, ama ilmaha uu ka masuulka yahay ilma laga masuul yahay in dib laguula dejiyo Canada adiga, ilaa inta ay ku qoran yihiin codsigaaga ka hor ka degidaada Canada.

Xubnaha kale ee qoyska, sida waalidka, awow ama ayay, ama walaalo iyo hablo walaalo ah, waa inay soo gudbiyaan codsigooda si looga fekerro dib u dejinta. Markaad timaado Canada, waxaad awood u yeelan doonaa inaad kafaale qaado xubnaha qoyska inay u haajiraan Canada haddii ay buuxiyaan [shuruudo gaar ah](#). Siday doonto ha noqotee, nidaamka in la keeno xubnahan qoyska Canada waxa uu qaadan karaa wakhti dheer, oo waxaa dhici karta inaad arag xubnaha qoyska sanado badan.

IRCC ma taageeri doonto qaban qaabada safarka ee xawayaanka rabaayada ah iyaddoo ay ku lug leedahay xawayaanka adeega mooyaane halka sababaha sharciga laga helo si loogu cudur daaro safarkeeda Canada. Qaxootiga waa inay sameeyaan qaban qaabada safarka ee xawaaynka rabaabayada ah ee qoyska iskood.



## Heerkaaga socdaalka

---

Markaad Canada timaado, waxaa lagu siin doonaa waraaqo loogu yeedho Xaqiijinta Degenaanshaah Joogtada ah oo sheegaya inaad ku noolaan karto halka si joogta ah sidii **qof degen oo joogta ah**. Tan macnaheedu wax aweeye adigu inaad joogto gudaha Canada inta ka hadhay noloshaada. Waxaad awood u yeelan doontaa inaad ka shaqayso oo dugsi ka aado.

Waxaa jira shuruudo gaar ah inta ay leegtahay ee aad ku noolaanaysaa, **oo dhab ahaan noqonaysa**. gudaha Canada ka hor inta aanad codsan muwaadinimada, Marka aad buuxiso dhammaan shuruudaha, waxaad codsan kartaa inaad noqoto muwaadin Canadiyaan ah.

Macluumaad dheeraad ah waxaa laa heli karaa <https://www.canada.ca/en/immigration-refugees-citizenship/services/canadian-citizenship/become-canadian-citizen.html>, ama kooxdaada kafaale qaaka.

## Halka aad Canada kaga noolaan doonto

---

Canada waa wadanka labbaad ee ugu wayn adduunka, oo leh magaalooyin waa wayn iyo magaalooyin badan laakiin sidoo kale leh aagaga halka ay joogaan dad aad u yar ama aanay joogin dad. Badanka magaalooyinka muhiimka waxay ku yaalaan qaybta koonfureed ee Canada, oo u dhow xadka ay la wadaagto Maraykanka.

Aagaga badankooda halka dadka ay ku nool yihiin way kala fog yihiin oo waxay qaadataa wakhti badan in la gaadho, xataa haddii loo duulo. Tusaale ahaan, masaafada udhexaysa Canada labbadeeda magaalo ee waa wayn, Toronto iyo Vancouver, waxay ka badan tahay 4,300 oo kiiloo mitir, ama ugu badnaan 3 maalmood oo bas ah.



Waxaa dib lagu dejin doonaa magaalo wayn ama magaalo halka kooxda ku kafaale qaadaysaa degen yihiin.

Kafaalw qaadaha waxaa ka go'an inay kaa teegeeraan sidii aad ugu noolaan lahayd bulshadeeda oo aad kala shaqayn doonto inaad madax banaanaato. In kastoo aad leedahay xaqa aad ugu guurto meel kasta oo Canada ah, kafaale qaadaha waxaa keliya looga baahan yahay inay ku siiyaan taageero sanadkaaga koowaad **marka aad joogto bulshadooda**.

Haddii aad go'aan ku gaadho inaad u guurto meel kale oo Canada ah, kafaale qaaduhu awood uma yeelan doono inuu ku taageero adiga dhaqaale ahaan oo awood uma yeelaynaysid inaad hesho adeega dejinta dowladdu maalgeliso.





## Bulshadda Canada

---

Gudaha Canada, raga iyo haweenka way siman yihiin. Waxay leeyihiin xuquuq isku mid ah oo waxaa loola dhaqmaa heer isku mid ah oo ixtiraam ah. Raga iyo haweenka dhammaan qaybaha bulshadda, dhaqamada, isirka iyo diimaha ay iska dhex galaan oo waxaa loola dhaqmaa si isku mid ah.



Xor ayaad u tahay inaad ku hadasho fikradaada gudaha Canada, marka aad ixtrimaayso xaqa kuwa kale inay si la mid ah sameeyaan.

Waxaa jira kooxo badan oo bulsho iyo ururo raga, haweenka iyo carruurta oo aad ku biiri karto. Waxaad noqon kartaa mid ka qayb qaata hawlaha ciyaaraha sida kubbada cagta ama dabaasha, oo waxaa jira hawlo badan oo aad samayn karto qoys ahaan. Qaar waa bilaash, halka ay kharash ka yihiin kuwa kale.

Waxaa lagu isticmaali karaa in qoyskaaga oo dhan kula joogaan si ay kuu caawiyaan oo kuu taageeraan. Marka la joogo Canada, waxaad dareemi kartaa keli, laakiin keli ma tihid. Haddii aad walaac qabto, la xidhiidh kafaale qaadaahaaga ama la hadal qof bulshaddaada ka mid ah. Waxaa jira dadka halka kaa caawin kara adiga inaad la qabsato nolosha gudaha Canada.

Haddii ay jiraan kullamo dadka dhawaan yimid aagaaga, isku day inaad xaadiro. Tani waxay kaa caawin kartaa inaad saaxiibo cusub ka samaysato bulshadda dhexdeeda oo waxay kaa caawin kartaa inaad garato adeegyada aagaaga.

## Sharciyada Canada

---

Sharciyada Canada waxay aqoonsadaan oo ilaaliyaan xuquuqda aasaasiga ah iyo xoriyada qof kasta, oo uu ku jiro xoriyada iyo sinaanta. Heshiiska Xuuqda Canadiyaanka iyo Xoriyaha waa qayb ka mid ah Dastuurka Canada. Way kuu ilaalinaysaa isla marka aad Canada timaado.



Iska jir falalka qaarkood waa sharci darro Canada kuwaas oo aan sharci darro ka ahaan karin wadankaaga aad degenayd. Waa sharci darro oo waxaa loo arkaa fal dembi inaad wax ku dhufato haweenay ama ilme, inaad ka tagto carruurta oo aanu la joogin qof wayni, inaad wadato baabuur caymis la'aan ama liisan la'aan, ama carruurta yaryar inay ku safraan baabuur iyagoon lahayn kursiga baabuurka. Sidoo kale waa sharci darro in lagu kaajo lagu saxaroodo meel dad wayne, in kastoo ay jiraan goobo suuliyaal bilaash ah badanka goobaha.

Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan sharciyada Canada iyo nidaamka cadaalada waxaa laga heli karaa [bogga internarka](#) dowladda Canada.





## Luqadda

Canada waxay leedahay 2 luqaddood oo rasmi ah: Ingiriisi iyo Faransiis Xirfadaha Ingiriisiga iyo Faransiiska aad ayay muhiim u yihiin inay kaa caawiyaan inaad degto Canada.

Ingiriisigu waa luqadda guud haan lagu hadlo badanka gobolada iyo dhulalka. Faransiisku waa luqadda ugu muhiimsan ee lagu hadlo Quebec, si kastaba ha ahaatee waxaa jira bulshooyin Faransiis ah dhammaan gobolada iyo dhulalka Canada oo dhan. Sidoo kale waxaa jira dad degen oo laga tiro badan yahay kuwaas oo Ingiriisiga ku hadla gudaha Quebec.



Xirfadaha xoogan ee Ingiriisiga ama Faransiiska waxay kaa caawin doonaan helida shaqada, tegida dugsiga, helida adeegyada iyo saaxiibo samaysashada. Haddii ay suuragal tahay inaad horumariso Faransiiskaaga ama Ingiriisiga ka hor imaanshaha Canada.

Markaad joogto Canada, waxaad qaadan doontaa xiisadaha luqadda dowladdu maalgeliso oo aan lacag kugu joogin. Kafaale qaadahaaga waxa uu kaa caawin doonaa macluumaadka sida loo helo heerarkaaga luqadda lagu qiimeeyay iyo sida la isku diiwaangeliyo barnaamijyada tababarka luqadda.

## Helida shaqada

In kastoo adiga iyo qoyskaaga aad heli doontaa caawimo dhaqaale muddada sanadkaaga koowaad ee Canada, waa fikrad wanaagsan in la diyaaro helida shaqada markaas waxaad awood u yeelan doontaa inaad daryeesho naftaada iyo qoyskaaga.

Markaa aad si wanaagsan ugu hadasho Ingiriisiga ama Faransiiska, waxaa fududaanaysa inaad shaqo hesho. Shaqooyinka aad loo kormeero iyo ganacsigu waxay u baahan yihiin adigu inaad:

- ku wanaagsanaato Ingiriisiga ama Faransiiska,
- aad lahaado aqoon xoogan dhammaan luqadda shaqada la xidhiidha, iyo
- fahanto weedhaha ama jumladaha la isticmaalo, qaar gooni u ahaan kara Canada.



Haddii aad karto, isku day inaad ogaato wax ku saabsan shuruudaha luqadda loo baahan yahay inaad ka shaqayso qaybtaada. Markaad joogto Canada, kafaale qaadahaagu waxa uu kaa caawin karaa inaad isku diiwaangeliso fasalada luqadda. Kafaale qaadahaagu waxa uu sidoo kale ku xidhi doonaa adeeg bixiyayaasha bixiya kullamada macluumaadka bilaashka ah ama adeega gaarka ah si lagaaga caawiyo inaad hesho shaqo.

Haddii aad haysato digriiga jaamacada, dibloomada kulliyada ama shahaadada ganacsiga, waxa laga yaabaa inaan laga aqbalin gudaha Canada. Waxay khusaysaa dowlada gobolka ama guddida maamulka halka aad ku nooshahay inaad go'aan ku gaadho maaha digriigaaga/shahaadada ama warqaddaha kale ee la aqoonsan yahay. Adeeg bixiyayaasha sidoo kale waxay kaa caawin karaan inay kugu hagaan dhexda nidaamka.

Mutadawacnimada sidoo kale waa qaab wanaagsan oo lagu helo khibrada shaqada Canada. In kastoo aan lacag lagu siinayn mutadawacnimada, waxay kaa caawin kartaa inay horumariso xirfadaha luqaddaada oo waxaad ka heli kartaa khibrad iyo xirfadaha lama huraanka ah si loo codsado shaqooyinkan. Sidoo kale waa qaab wanaagsan oo lagu samaysto saaxiibo oo lagula kulmo dadka bulshaddaada.



## Adeegyada dejinta

---

Adeegyada dejinta waxaa lagu maalgeliyay socdaalka, Qaxootiga iyo Muwaadinimada Canada (iyo Ministère de l'Immigration, de la Diversité et de l'Inclusion in Quebec) oo waxaa laga heli karaa dhammaan dadka si joogta ah u degen Canada, ay ku jiraan qaxootiga dib loo dejiyo. Adeegyadan waa bilaash oo waxay kaa caawin karaan si wanaagsan inaad ugu diyaar garowda oo lala qabsado nolosha Canada.

Waxaa jira adeegyada onalyanka imaanshaha ka hor ee [Socdaalka, Qaxootiga iyo Muwaadinimada Canada websaydka](#) si loo diyaariyo adigu inaad ku noolaato Canada. Waxaad heli kartaa adeegyadan marka aad hesho xaqijinta codsigaaga in la ansixiyay.

Marka aad joogto Canada, xirfad yaqaanada dejinta waxay bixiyaan kala duwanaanshaha adeegyo gaar ah in lala qabsado nolosha Canada. Tani waxaa ku jira caafimada helida shaqada, tababarka luqadda, tababarka shaqada u gaarka ah, adeegyada dhalin yarada iyo dadka waa wayn, iyo wax badan.

Liiska buuxa oo adeegyada dejinta ah ee ay maalgeliso Socdaalka, Qaxootiga iyo Muwaadinimada Canada waxaa lagu heli karaa [onalyn](#).

## Kharashadka

---

Markaad tagto Canada, waxaad heli doontaa taageerada dhaqaalaha ah oo ka timaada kafaale qaadahaaga gaarka ah oo 12 bilood ah, ama ilaa aad isku filnaanto -- ku kastoo soo horeeya.

Marka taageerada ka timid kafaale qaadahaagu dhammaato, waxaad ka masuul ahaan doontaa bixinta kharashkaaga, ay ku jirto cuntadda, kirada, korontadda, biyaha, dharka iyo cashuuraha. Waa muhiim in la barto sida miisaanyida loo sameeyo lacagtaada.

Haddii aanad shaqo heli karin ka dib 12 bilood oo waxaada u baahan tahay caawimada taageerada qoyskaaga, waxaa jira adeegyo bulshadda kala duwan sida kaydka cuntadda iyo ururada samafalka caawimada siiya oo aad u baahan tahay. Waxaa jira barnaamijyo taageero dhaqaale oo kala duwan ay siiso dowladdu dadka baahan, si kastaba ha ahaatee waa inaad hubisaa heerka qiimaynta gaarka ah inaad buuxiso si aad uga faa'iidayso barnaamijyada. Waydii kafaale qaadahaaha wixii macluumaad dheeraad ah waxa uu yahay taageerada la heli karo gudaha bulshadaada.

Waxaad sidoo kale dooni kartaa inaad lacagta u dirto qoyskaaga wadanka joogay. Xor ayaad u tahay inaad sidaas samayso, laakiin dad badan way ku adag tahay inay taageeraan nafahooda oo weli ay lacag ay qoyskii u diraan ay u hadho. Waxyaabo badan waxay noqon karaan kharash badan gudaha Canada oo ka badan intaad bixin jirtay. Xusuuso inay wakhti qaadan doonto inaad la qabsato noloshaada cusub ee Canada.



## Dugsiyada

---

Lacag kama bixinaysid carruurtaada si ay u dhigtaan dugsiya hoose ama dugsiya sare. Dhammaan carruurta u dhexaysa 6 iyo 16 waa inay tagaan dugsiya. Waa sharciga. Badanka ardayda dhigata dugsiya sare ilaa ay helaan dibloomada qalan jebinta (ilaa 18 sanado).

Markay dhammeeyaan dugsiya sare, carruurtaadu waxay sii wadan karaan jaamacadda ama kulliyada. Kulliyada iyo jaamacaddu waa lacag, laakiin kulliyada iyo jaamacaddu waxay lahaan karaan ilo ay ka caawiya inay helaan deeq waxbarasho, deeq ama amaahda ardayda.



## Daryeelka caafimaadka iyo ilkaha

---

Sidii qof joogto u degen Canada, waa inaad bixin adeegyada badanka daryeelka caafimaadka, ay ku jiraan booqashooyinka cusbitaalka ama dhakhtarka.

Markaad timaado Canada, waxaa lagu siin doonaa Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Federaalka Ku meel gaadhka ah (IFHP). Caymiska IFHP waxay bixisaa daryeelka caafimaadka aasaasiga ah (ay ku jirto booqashooyinka dhakhtarka ama cusbitaalka) ilaa aad uqalanto caymiska caafimaadka gobolka ama deegaanka, taas oo caadi ahaan dhacda 3 bilood gudahood. Muddada wakhtigan, waa inaad codsataa caymiska caafimaadka gobolka ama deegaanka halka aad ku nooshahay.



Waa muhiim in loo soo bandhigo warqadahaaga u qalmida IFHP adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka wakhti kasta oo aad booqato. Waxaad heli kartaa adeegyada daryeelka caafimaadka meel kasta oo Canada oo ka timid adeeg bixiye daryeel kasta kaas oo diiwaangashan. Liiska adeeg bixiyayaasha diiwaanka gashan waxaa lagu heli karaa [onayn](#) hoosta liiska "Raadi Adeeg bixiyayaaha IFHP.

IFHP sidoo kale waxay bixisaa caymiska dawo qorida iyo caymiska kaabbida si wax looga qabto baahiyaha degdega ah iyo daryeelka caafimaadka koowaad (tusaale ahaan, adeegyada caafimaadka maskaxda, daryeelka araga xadidan iyo daryeelka ilkaha ee degdega ah ee xanuun baabiinta iyo caabuqa). Caymiska kaabbida iyo dawo qorida waxaa la siiyaa ilaa inta aad hesho taageerada dhakhliga ee ka timid kafaale qaadahaaga gaarka ah.

Macluumaad kooban oo dhammaan dheefaha IFHP iyo adeegyada waxaa laga heli karaa [Socdaalka, Qaxootiga iyo Muwaadinimada websaydka Canada](#).

Kafaale qaadaha waxa uu kaa caawin karaa doorashada dhakhtarka qoyska, helida dhakhtarka ilkaha, iyo ku xidhidaada dhakhtarka maskaxda iyo la talinta jahwareerka la soo maray halka ay lama huraan tahay.

Gobol kasta iyo deegaan kasta waxa uu leeyahay qorshihisa caymiska caafimaadka. Hubso inaad ogaato waxa qorshahaaga caymisku yahay. Kafaale qaadahaaga waxa uu kaa caawin doonaa inaad codsato warqaddaha muhiimka ah markaad timaado Canada.

Qaxootiga ku cusub Canada inta badan waxay dareemaan cidlo iyo go'doon, oo waxaa ku dhici kara walbahaar joogto ah iyaddoo ay sababtay waxyaabahii ku soo dhacay xiligii hore. Waxaa jiri kara adeegyo bilaash ah iyo dad tababaran inay la hadlaan cida dawayn karta nabaradan. Haddii aad caawimo raadinayso, waydii kafaale qaadahaaga waxa ku saabsan caafimaadka maskaxda iyo adeegyada la talinta lagu heli karo adiga.



## Tallaalka

---

In lagaa tallaalo cudurada waa mida ugu amniga badan iyo qaabka ugu waxtarka badan ee cudurada looga hortago, waxyaabaha cudurada soo raaca iyo dhimashada hore u timaada.

Tallaalka waxa uu ka shaqeeyaa caawinta in la dhiso nidaamka difaaca jidhkaaga. Sida dhammaan gudaha Canada, tallaalka waxa uu maray xaqiijin buuxda iyo nidaamka oggolaanshaha ka hor intaan dadka loo keenin.

Guddida dhakhtaariirta waxay bixin ku siin karaa tallaalka si aad u cusboonaysiiso heerkaaga tallaalka muddada baadhitaankaaga caafimaadka socdaalka, ka hor inta aanad iman Canada. Adeegyadan khasab maaha. Haddii aad doorato in lagula tallaalo dibada, waa inaad u soo qaadataa diiwaankaaga tallaalka Canada.

Marka aad Canada joogto, tallaalka badan waxaa lagu bixiyaa caymiska daryeelka caafimaadka gobolka ama deegaanka. Adiga iyo qoyskaaga waxaad u nuglaan kartaan cudurada tallaalka ka hortaggi karo, gaar ahaan haddii aanad helin tallaalka xiligii la soo dhaafay. Dhallaanka iyo carruurta da'da yar gaar ahaan waxay u nugul yihiin cudurada laga hortago qaarkood, qaybaha Canada qaarkood, carruurta waxay u baahan yihiin in la helo dhammaan tallaalkooda inay cusbooneeyaan ka hor bilaabida dugsiga ama daryeelka maalinta.

Kafaale qaadahaaga, dhakhtarka ama rugta caafimaadka dhammaan waxay bixin karaan macluumaad dheeraad ah sida loo cusboonaysiiyo heerka tallaalkaaga.

Waa go'aan gaar ah in naftaada iyo/ama xubnaha qoyskaaga la tallaalo. Laakiin xusuuso, marka lagu tallaalo, waxaad naftaada ka ilaalinaysaa iyo kuwa kale cudurada gaarka ah oo waxaad ku caawinaysaa inay joojiyaanku faafinta cudurka kuwad aadka ugu nugul.

## Cuntadda iyo biyaha

---

Biyaha la cabayo Canada amni ayay u yihiin in la cabbo. Guri kastaa waxa uu leeyahay biyahiisa kulul iyo kuwa qabow oo socda. Waxaad biyaha heli kartaa wakhti kasta oo maalinta ama habeenka ah.

Kala duwanaanshaha cuntada in la iibsado waxay ku xidhnaan doontaa bulshaddaada. Magaalooyinka Waa wayn, ee kala duwan ee Canada hubaal ahaan waxaad ka heli doonaan badanka cuntooyinka aad caadi ahaan cunto, marka bulshooyinka yar ay haysan karaan kala duwanaansho yar.

Dadka ka yimid kooxaha isirka ee ku nool Canada, taas oo macnaheedu yahay inay jiraan kala duwanaansho badan oo cuntooyinka ah oo ka duwan dhaqamo badan, oo caadi ahaan waxaad ka heli kartaa dukaamada alaabta gaarka ah iibiya wixii cuntooyinka gaarka ah. Cuntooyinka qaarkood way ka qaalisanaan karaan kuwaad badalaa la cuno iyaddoo ay sababtay cimilada Canada iyo baahida in la dhoofiyo.



## Diinta

Diimo badan ayaa Canada laga haystaa. Waxaa lagu oggolaan doonaa inaad taada ugu dhaqanto si xor ah. Sharciga Canada waxa uu u baahan yahay inaad tixgeliso dadka haysta diimaha kala duwan. Laguma waydiin doono ama laguguma khasbi doono diintaada. Xoriyada diinta waa mid ka mid ah xuquuqaha aasaasiga ah ee Canada.



Marka kafaale qaadahaaga aad kala diin duwan tihiin, waxaad sii wadan kartaa inaad si xor ah ugu dhaqanto diintaada. Dadkan waa mutadawaciiin kuwaas oo doonaya inay kaa caawiyaan inaad timaado Canada oo aad u dhex gasho si guul leh, waajibaad la'aan.

## Jawiga hawadda

Waxaa jira 4 xili oo kala duwan Canada, gu'ga, xagaaga, dayrta iyo jiilaalka. Canada waa wadan aad u wayn oo cimila xili kasta way kala duwanaan kartaa qaybaha wadanka.

Gu'ga (Maaros, Abriil iyo Maayo) waa xiliga roobka badan qaybaha Canada, iyo jawiga waxa uu noqon karaa mid qabow. Xagaaga (Juun, Juulay iyo Ogosoto), jawiga hawada ama cimiladu aad ayay u diiran tahay badanka qaybaha wadanka. Muddada maalinta, heerkulka caadi ahaan waxa uu ka sareeya 20°C oo intabadan waxa uu gaadhaa meel ka saraysa 30°C.



Dayrta (Sebtabar, Oktoobar iyo

Noofambar), jawiga hawada waa qabow oo sidoo kale waxaynoqon kartaa mid aad u rooban. Muddada bilaha jiilaalka (Diisambar, Janaayo iyo Febraayo) aad ayay u qabowdahay badanka meelaha, leedahay heerkul inta badan ka hooseeya 0°C. Barafka ayaa daboolka dhulka laga bilaabo Diisambar ilaa Maarso ama Abriil. Koonfur galbeed British Columbia (aagag Victoria iyo Vancouver) roobka aad ayuu caan u yahay jiilaalka in ka badan barafka.

Iyaddo ku xidhan halka aad ka timid, aad ayaad uga yaabi kartaa qabowga iyo barafka muddada jiilaalkaaga koowaad gudaha Canada. Addoo xidhanaya dharka saxda ah, waxaad u diyaar garoobaysaa inaad xiisayso quruxda goonida ah ee jiilaalka Canada. Kafaale qaadahaagu waxa uu kaa caawin doonaa helida koofiyada, buudhka, galoodiyada iyo koodhadhka jiilaalka qoyskaaga.



## Erayada u dambaysa ee talada

---

Bilaabida nolol cusub gudaha Canada way xiiso badan tahay oo waxaa ka buuxa fursaddo cusub. Si kastaba ha ahaatee waxaa jiri doono caqabado sidoo kale. Dadka qaar way ku adkaataa inay la qabsadaan. Wakhti ayay qaadataa, markaas isku day inaad samirto. Xusuuso in dad badan oo dhawaan yimid sidaadood kale ay la qabsadeen oo si buuxda ay u dhex galeen bulshadda Canada.

Waxaa jira dad iyo adeegyo la heli karo si ay kuu caawiyaan. Kafaale qaadahaagu waxaa la heli karaa si uu uga jawaabo walaacyo kasta ama su'aalo aad qabi karto. Waxay raadinayaan danahaaga ugu wanaagsan. Waxaad sidoo kale, la xidhiidhi kartaa [Socdaalkaaga, Qaxootiga iyo Xafiiska Socdaalka Canada ee Muwaadinimada](#) wixii su'aalo ah ee ku saabsan codsigaaga.

Khayraadka kale ee suuragalka ah ee la heli karo waxaa ka mid ah kooxaha bulshadda, kooxaha diinta, adeegyada la talinta iyo ururada dowladdu maal geliso ee dejinta. Kooxahan dhammaan waxay leeyihiin waayo aragnimada caawinta dadka dhawaan yimid inay u dhex galaan qaabab kala duwan. Ha ka cabsoon inaad caawimo waydiisato.

Haddii si kastaba aad u rumaysan tahay in si xun laguula dhaqmay ama lagaa faa'iidaystay, ama aanad helin qadarkii taageerada ahaa ee uu ku balan qaaday kafaale qaadahaagu, fadlan la xidhiidha Socdaalka, Qaxootiga iyo Muwaadinimada Canada isla markaaba [IRCC.INPSR-PPRRI.IRCC@cic.gc.ca](mailto:IRCC.INPSR-PPRRI.IRCC@cic.gc.ca).

Ma jirto khatarta waayida taageerada dhaqaale ama heerkaaga degenaanshaha addoo la xidhiidhaya Socdaalka, Qaxootiga iyo Muwaadinimada Canada.

Ugu dambaystii, waxaa jira websaydyo laga heli karo macluumaad badan oo kaa caawiya inaad diyaar garowdo. Websaydkayada gobolka waxaa ku jira macluumaad badan oo faa'iido leh, ay ku jiraan su'aalaha inta badan la iswaydiiyo, linkiyada bulshada, wararka iyo dhacdooyinka.

Dowladda Canada websaydkeeda waxaa ku jiraa faahfaahin badan oo ku saabsan nololsha Canada, liiska khariidada ururada adeega dejinta gudaha bulshooyinka dhammaan wadanka, macluumaadka qiimaynta luqadda xorta ah iyo adeegyada tababarka, iyo khayraad dheeraadka ah si loogu diyaar garoobo safarkaaga ilaa Canada.

[www.canada.ca/immigration](http://www.canada.ca/immigration)

